

KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED



Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Mogadiscio, 13 Nofembre 1974

L. 2 R. L. 11

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 44, Tr. 2 Oktoobar 1974 — *Qorista Buugaagta sugaanta, Cilmiga iwm.*

Bog. 501

SHARCI L. 45, Tr. 24 Oktoobar 1974 — *Meel marin Heshiis Iskaashi Dhaqaale iyo Dhaqan oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimograadiga Soomaaliy iyo Ciraaq.*

» 505

BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-CANKA, Tr. 23 Oktoobar 1974, L. 123 — *Dallacaad iyo aqoonsi Jaalle G. Dh. Daahir Max'ed Diiriye.*

» 506

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAADHISIINTA, Tr. 18 Oktoobar 1974, L. 124 — *Dhimid tarifada Boosta iyo Isgaadhsiinta inta Carwada Saddexaad ee Waddaniya ay socoto.*

» 507

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO IGSAADHSIINTA, Tr. 28 Oktoobar 1974, L. 125 — *Baahi loo qabo in loo sameeyo tacriyo cusub Telefoonka Dalka gudihiisa.*

Bog. 508

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUU, Tr. 1 Agoosto 1974, L. 126 — *Sismo dhul Dawladeed la siiyey Jaalle Maxyadiin Muuse Jumcaale, kuna yaal Muqdisho Jidka Bender Qaasim, kuna fadhiya mq. 1,200.*

» 517

BOGGA SEDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cali Jaamac Biixi.* (236)

Bog. 518

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Xaaji Xuseen.* (237)

» 518

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xasan Nuur Guuled.* (238)

» 519

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Axmed Xuseen.* (239)

» 519

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Cabaas Suufi.* (240)

» 520

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Impresa Sudano e Pizzoglio.* (241)

» 521

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Aadan Cabdulle Hillowle.* (242)

» 521

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Axmed Yusuf Xuseen.* (243)

» 522

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Seynab Sheekh Cali.* (244)

» 522

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cabdullahi Axmed Maxamed.* (245)

» 523

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Khadiija Saalax Cabdulla.* (246)

» 523

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Isaga Axmed Maxamed.* (247)

» 524

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED, Ogeysiis <i>Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad, (248)</i>	» 525
MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR, Ogeysiis <i>Lumid Buug L.624 — Maxamed Xuaji Xasan. (249)</i>	» 525
MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Ogeysiis <i>Lumid Buug L. 472 — Maxamed Maxamuud Maxamed. (250)</i>	» 526
SHARIKADDA FIYAAT SOOMAALIYA S.p.A. — Ogeysiis <i>(251)</i>	» 526
HABO — TONNARA DI HABO — S. A. (252)	» 527
KANDALA - INDUSTRIE SOMALE CONSERVIFICI E PESCA - S.p.A. (253)	» 527

BOGGA KOWAAD SHARCI

SHARCI L.44, Tr. 2 Oktoobar 1974.

Qorista Buugaagta.

MADAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Bahida loo qabo in la dejijo Sharciga ku saabsan daabacaadda buugaagta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGAN HOOS KU DHIGAN

Qodobka 1aad

Fasiraad

Haddii aan si kale loo macnayn, erayda soo socda waxaa loola jeedaa sida hoos ku dhigan:

«Xoghayaha Dawladda» waa Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

«Guddi» waa Guddiga Qiimiyinta Buugaagta ee ku tilmaaman Qodobka 5aad ee Sharcigan;

«Agaasimaha Guud» waa Agaasimaha Guud ee Akademiyada Dhaqanka;

«Qoraaga» waa qofka qoray buug ama tarijumay;

«Wakaaladda» waa Wakaaladda Madbacadda Qaranka.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu habeynayaa wax alla wixii buugaag suugaaneed ama/yo cilmi oo la doonayo in la daabaco.

Qodobka 3aad

Daabacaadda buugaagta kor ku tilmaaman waxay ku xiran tahay habka ku degsan Sharcigan oo la raaco iyo oggolaansha kama dambeysta ah ee Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 4aad

1. Qoraaga doonaya in buugiisa la daabaco, wuxuu Agaasimaha Guud u soo gudbinayaa fiaf-tirka hoos ku dhigan:

- a) Magaciisoo dhan;
- b) da'da iyo jinsiyada;
- t) Tirada buugaagta uu horey u qoray haddii ay jiraan;
- j) 10 nuqli oo buugga oo makiinad ku dhigan;
- x) Xogwartran guud oo koobaya dulucda buugga.

2. Tifaf-tirka kor ku tilmaaman markuu helo Agaasimaha Guud wuxuu u gudbinayaa Guddiga èu tilmaaman Qcd. 5aad ee Sharcigan.

Qodobka 5aad

1. Waxaa la dhisayaa Guddiga Qiimaynta buugaagta oo ka koo-banta xubno ka tirsan:

- a) Akademiyada Dhaqanka (Guddigoonshe);
- b) Wakaaladda Madbacadda Qaranka;
- t) Xafiiska Siyaasadda ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Ka-caanka;
- j) Ciidamadda Nabab Sugidda Soomaaliyeed.

Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu u yeero qof kasta oo ay la tahay inuu aqoon dheeraad ah u leeyahay dulucda buugga hor yaal Guddiga.

2. Guddigu wuxuu ka hoos shaqeeyayaa Akademiyada Dhaqanka oo uu ka qaadan doono wixii tusaale-loo baahan vahav.

Qodobka 6aad

1. Hawlaha Guddigu, guud ahaan, waxay noqonaysaan in buugga hor yaal laga fiiriyo dhinaca dulucda, habka qorista, hiddaha, siyaasadda iyo mabda' iyo xagga farsamada, qiimaynta, iibka, iyo qaybinta buugga.

2. Dhinacyada kor ku tilmaaman marka laga fiiriyo buugga, Guddigu wuxuu go'aan ka qaadanayaan in la daabaco buugga iyo in kale.

Qodobka 7aad

Marka buugga daabacaadiisa lagu heshiyo, Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu soo jeediyo in qoraaga la siiyo:

- a) Gunno u dhiganta waxtarka Buugu leeyahay iyo hawsha laga maray qoridiisa;
- b) 20% wixii faa'iido buugga laga helo marka laga gooyo kharskii daabacaadda, gunnada qoraaga la siiyey iyo wixii kale ee kharash la xiriira.

Qodobka 8aad

1. Buugga waa la daabici-karaa mar iyo in ka badan.

2. Haaddi buugga mar labaad iyo in ka badan la daabaco, waxaa qoraaga lagula dhaqmayaan sida ku tilmaamian xarafka (b) qaybta (1) ee qodobka 7aad ee Sharcigan, ayadoo mar walba ay ku xiran tahay oggolaanshaha Guddiga iyo Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 9aad

1. Dadka qora ama tarjima buugaagta Dugsiyada, xarumaha cilmi-ga, wasaaradaha, Wakaaladaha, iwm, waxaa la siinayaa abaalgud (Premium) u dhiganta waxtarka buuggu leeyahay iyo hawsha laga maray qorista.

2. Abaalgudkaas waxaa bixinaya Wakaaladda-Wasaaradda uu qof-ku ka shaqeeyo.

Qodobka 10aad

Guddiga markuu garto inaan la daabiciin buug, wuxuu u celinayaa qoraaga hal nuqlu, iyo warcelis.

Qodobka 11aad

1. Go'aanka Guddigu gaaro waxaa Xoghayaha Dawladda u gud-binaya Agaasimaha Guud isagoo caddaynaya sababaha lagu oggolaaday amma loo diidovu buugga daabacaadiisa qivaasta gunnada jwm.

2. Xoghayaha Dawladda wuxuu awood u leeyahay inuu wax ka beddelo ama diidoo go'aanka Guddiga.

Qodobka 12aad

Marka la oggolaado in la daabaco, waxaa buuggii loo gudbinayaan Wakaaladda.

Qodobka 13aad

Wakaaladdu waxay markaas mas'uul ka noqoneysaa:

- a) daabacaadda buugga;
- b) qabilidda kharashka daabacaadda, bixinta gunnada iyo boqolleyda ku tilmaaman Qodobka 7aad ee Sharcigan, iwm.;
- t) Fidinta iyo gadista buugga.

Qodobka 14aad

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa xuquuqda qoraaga (Copy right).
2. Gunnada iyo boqolleyda ku tilmaaman Qod. 7aad ee Sharcigan ka sokow qoraagu wuxuu xaq u leeyahay in magaciisa lagu qoro buugga.

Qodobka 15aad

1. Haddii baahiyi timaado, buugaagta qaarkood waxaa lugu daabici karaa dibadda.
2. Oggolaanshaha, gunnada qoraaga la siinayo, iwm waxaa lagula dhaqmayaa Qoddobbada Sharcigani dhigayo.

Qodobka 16aad

Haddii buugaagta qaarkood la goosto in si weyn loo faafyo qiimahoodana la yareeyo si dadweynaha uga faa'iideysto, ama buugga sidii la filaayey u gadmi waayo, halkaasna kharash dheeraad ah ka soo baxo, waxaa Wakaaladda waajib ku ah in kharashkaas dheeraad ka ahay ka bixiso faa'iidata ay ka hesho buuggagta kale.

Qodobka 17aad

Sharci ama Xeer kasta oo ka soo hor jeeda Sharcigan waa la buriyay.

Qodobka 18aad

Sharcigani marka la saxiixo ka dib deg-deg ayuu u dhaqan gelayaan. Muqdisho, 2 Oktoobar 1974.

SHARCI L. 45, Tr. 24 Oktoobar 1974.

Meel marin Heshiis Iskaashi Dhaqaale iyo Dhaqan oo dhixmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya iyo Ciraaq.

GUDDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhixmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Ciraaq lagu kala saxiixday Magaalada Baqdaad 20kii 4-1974;

ISAGOO TIGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaash lambarkiisu ahaa XGX-10-198-74 ee 19kii Oktoobar 1974;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiskii la kala saxiixday 20kii Abril 1974 kuna saabsanaa Iskaashi dhaqaale iyo dhaqan ka dhixeyya Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Ciraaq.

Hehiisku wuxuu yeelanaayaa astaan sharci, wuxuuna ka mid noqonaayaa sharciyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 10kii Oktoobar 1974, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Oktoobar 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAH

GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER MADAXWEYNAYA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 23 Oktoobar 1974, L. 123.

Dallacaad iyo aqoonsi Daahir Maxamed Diiriye.

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka
21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAAYA Talooyinkii Xoghayaha Wasaaradda
Arrimaha Gudaha;

ISAGOOAQOONSADAY Go'aankii labada Gole taariikhdiisuna
ahayed 1-8-1974;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. In Jaalle Gaashaanle Dhexe Daahir Maxamed Diiriye loo aqoon-saday in uu ku dhintay shaqo Dawladeed, dadka dhaxalkiisa lehna la siyo xuquuqda uu leeyahay qofkii shaqo ku dhinta, iyadoo la raacayo qodobka 19aad ee sharciga Hawlgabka iyo Miilitirka ee Ciidamada Qalabka sida, sharciga lambarkiisu yahay 6 taariikhdisuna tahay 31-12-1969.

Qodobka 2aad

Hawlkar nimadiisa iyo wadan nimadiisa iyadoo la tixgeliyey waxaa loo gartay in darajadiisa la gaarsiiyo G. Sare «POSTHUMOUS» isla mar-kaana la siiyo Bilad shaqo ah «POSTHUMOUS».

Qodobka 3aad

Dhaqan gelid

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

VISTO e registrato - Reg. n. 4, foglio n. 155.

Mogadiscio, li 23 Ottobre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUUR

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

Tr. 18 Oktoobar 1974, L. 124.

Dhimid tariifada Boosta iyo Isgaarsiinta inta Carwada Saddexaad ee Waddaniga ah socoto.

WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 21aad ee Sharciga Boosaha Lambarkii-suna yahay 62 oo soo baxay 22kii Sebtember 1971;

ISAGOO ARKAY Degreetada Wasaaradda ee 12kii Disember 1971, Lr. 287 oo tariifada Boostadu ay ku soo baxday;

ISAGOO TIXGELINAYA Siyaasadda Kacaanka oo ah dhiirrigelinta Carwada Waddaniga ah;

WUXUU GUDDOMIYHEY

Qodobka 1aad

Iyadoo la dhiirrigelinayo Carwada 3aad ee Waddaniga ah, Wasaaradda iyo Isgaarsiintu waxay dhimeysaa, inta Carwadu ay socoto, 50% (boqolkhiba konton) tariifadeeda ku saabsan warqadaha, Taararka iyo Telefoonada laga diranayo Xafiiska Boosta ee Carwada ka furan una socda dalka gudhiisa.

Qodobka 2aad

Degreetadani waxay dhaqan geleysaa 18ka Oktoobar 1974 waxaana lagu faafin doonaa Bollettino Ufficiale.

Muqdisho, 18 Oktoobar 1974.

Xoghayaha Boosaha iyo Isgaarsiinta
G. S. Axmed Maxamuud Faarax

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 94.

Mogadiscio, li28 Ottobre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISGAARSIINTA

Tr. 28 Oktoobar 1974, L. 125.

Baahi loo qabo n loo sameeyo tacriifo cusub Telefoonka Dalka gudhiisa.

XOGHAYAHA

WASAARADDA BOOSTA IYO ISGAARSIINTA

ANIGOO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka Oktoobar 1969;

ANIGOO ARKAY Qodobka 9aad ee Tacrifada Telefoonka u yaal ee sharciga lambarkiisu yahay 58 taariikhdiisuna tahay 16 Marso 1966.

ANIGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in loo sameeyo Tacriifo cusub Dalka gudhiisa telefoonka lagu isticmaalo (Magaalo ilaa Magaalo);

WAXAAN XEERAY

Qodobka 1aad

QIIMAHА WACIDDA TELEFOONADA DALKA GUDIHIISA

Qof alla qofkii doona inuu telefoon u dirsado dalka gudhiisa — magaalo ilaa magaalo — waxa waajib ku ah inuu bixiyo qiimaha hoos ku qoran:

Km. ilaa Km.	3dii Daqiqo Sh. So.	Daqiqadii dheeraad ah Sh. So.
Ilaa 25 Km.	2.10	0.70
26 — 50	3.00	1.00
51 — 75	3.60	1.20
76 — 100	4.80	1.60
101 — 150	5.70	1.90
151 — 200	6.00	2.00
201 — 300	7.20	2.40
301 — 400	8.10	2.70
401 — 500	9.00	3.00
501 — 600	9.90	3.30
601 — 700	10.80	3.60
701 — 800	11.40	3.80
801 — 900	12.00	4.00
901 — 1000	12.60	4.20
1001 — 1500	13.20	4.40
1500 Km. wixii ka badan	15.00	5.00

Ka	Ku	3dii Sh.	Daqiiqo So.	Halkii ee dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
Muqdisho	Baydhabo	7.20		2.40	2.40
»	Beled Weyne	8.10		2.70	2.70
»	Gaalkacayo	11.40		3.80	3.80
»	Boosaaso	13.20		4.40	4.40
»	Hargeysa	15.00		5.00	5.00
»	Burco	13.20		4.40	4.40
»	Berbera	15.00		5.00	5.00
»	Afgooye	3.00		1.00	1.00
»	Shalambood	4.80		1.60	1.60
»	Janaale	5.70		1.90	1.90
»	Marka	5.70		1.90	1.90
»	Balcad	3.00		1.00	1.00
»	Jowhar	4.80		1.60	1.60
»	Qoryoley	5.70		1.90	1.90
»	Jelib	8.10		2.70	2.70
»	Jamaama	9.00		3.00	3.00
»	Kismaayo	9.00		3.00	3.00
Baydhabo	Muqdisho	7.20		2.40	2.40
»	Beled Weyne	10.80		3.60	3.60
»	Gaalkacayo	12.60		4.20	4.20
»	Boosaaso	15.00		5.00	5.00
»	Hargeysa	15.00		5.00	5.00
»	Burco	15.00		5.00	5.00
»	Berbera	15.00		5.00	5.00
»	Afgooye	7.20		2.40	2.40
»	Shalambood	8.10		2.70	2.70
»	Janaale	8.10		2.70	2.70
»	Marka	8.10		2.70	2.70
»	Balcad	8.10		2.70	2.70
»	Jowhar	8.10		2.70	2.70
»	Qoryooley	8.10		2.70	2.70
»	Jelib	9.90		3.30	3.30
»	Jamaama	10.80		3.60	3.60
»	Kismaayo	11.40		3.80	3.80
Beled Weyne	Muqdisho	8.10		2.70	2.70
»	Baydhabo	10.80		3.60	3.60
»	Gaalkacayo	8.10		2.70	2.70
»	Boosaaso	13.20		4.40	4.40
»	Hargeysa	13.20		4.40	4.40
»	Burco	13.20		4.40	4.40
»	Berbera	13.20		4.40	4.40
»	Afgooye	8.10		2.70	2.70
»	Shalambood	9.00		3.00	3.00
»	Janaale	9.00		3.00	3.00
»	Marka	9.00		3.00	3.00

Ka	Ku	3dii Daqiiqo Sh. So.	Halkii daqiiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
Belet Weyn	Balcad	7.20	2.40	2.40
»	Jowhar	7.20	2.40	2.40
»	Qoryoley	9.00	3.00	3.00
»	Jelib	10.80	3.60	3.60
»	Jamaama	11.40	3.80	3.80
»	Kismaayo	12.00	4.00	4.00
Gaalkacayo	Muqdisho	11.40	3.80	3.80
»	Beled Weyne	8.10	2.70	2.70
»	Baydhabo	12.60	4.20	4.20
»	Boosaaso	11.40	3.80	3.80
»	Hargeysa	12.00	4.00	4.00
»	Burco	9.90	3.30	3.30
»	Berbera	12.00	4.00	4.00
»	Afgooye	11.40	3.80	3.80
»	Shalambood	12.00	4.00	4.00
»	Janaale	12.00	4.00	4.00
»	Marka	12.00	4.00	4.00
»	Balcad	10.80	3.60	3.60
»	Jowhar	10.80	3.60	3.60
»	Qoryoley	12.00	4.00	4.00
»	Jelib	13.20	4.40	4.40
»	Jamaama	13.20	4.40	4.40
»	Kismaayo	13.20	4.40	4.40
Boosaaso	Muqdisho	13.20	4.40	4.40
»	Beled Weyne	13.20	4.40	4.40
»	Baydhabo	15.00	5.00	5.00
»	Gaalkacayo	11.40	3.80	3.80
»	Hargeysa	13.20	4.40	4.40
»	Burco	12.00	4.40	4.40
»	Berbera	12.00	4.00	4.40
»	Afgooye	15.00	5.00	5.00
»	Shalambood	15.00	5.00	5.00
»	Janaale	15.00	5.00	5.00
»	Marka	15.00	5.00	5.00
»	Balcad	13.20	4.40	4.40
»	Jowhar	13.20	4.40	4.40
»	Qoryoley	15.00	5.00	5.00
»	Jelib	15.00	5.00	5.00
»	Jamaama	15.00	5.00	5.00
»	Kismaayo	15.00	5.00	5.00

Ka	Ku	3dii Daqiiqo Sh. So.	Halkii daqiiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
Hargeysa	Muqdisho	15.00	5.00	5.00
»	Boosaaso	13.20	4.40	4.40
»	Beled Weyne	13.20	4.40	4.40
»	Baydhabo	15.00	5.00	5.00
»	Gaalkacayo	12.00	4.00	4.00
»	Burco	7.20	2.40	2.40
»	Berbera	6.00	2.00	2.00
»	Afgooye	15.00	5.00	5.00
»	Shalambood	15.00	5.00	5.00
»	Janaale	15.00	5.00	5.00
»	Marka	15.00	5.00	5.00
»	Balcad	15.00	5.00	5.00
»	Jowhar	15.00	5.00	5.00
»	Qoryooley	15.00	5.00	5.00
»	Jelib	15.00	5.00	5.00
»	Jamaama	15.00	5.00	5.00
»	Kismaayo	15.00	5.00	5.00
B u r c o	Muqdisho	13.20	4.40	4.40
»	Hargeysa	7.20	2.40	2.40
»	Baydhabo	15.00	5.00	5.00
»	Beled Weyne	13.20	4.40	4.40
»	Gaalkacayo	9.90	3.30	3.30
»	Boosaaso	12.00	4.00	4.00
»	Berbera	7.20	2.40	2.40
»	Afgooye	13.20	4.40	4.40
»	Shalambood	15.00	5.00	5.00
»	Janaale	15.00	5.00	5.00
»	Marka	15.00	5.00	5.00
»	Balcad	13.20	4.40	4.40
»	Jowhar	13.20	4.40	4.40
»	Qoryooley	15.00	5.00	5.00
»	Jelib	15.00	5.00	5.00
»	Jamaama	15.00	5.00	5.00
»	Kismaayo	15.00	5.00	5.00
Berbera	Muqdisho	15.00	5.00	5.00
»	Burco	7.20	2.40	2.40
»	Baydhabo	15.00	5.00	5.00
»	Beled Weyne	13.20	4.40	4.40
»	Gaalkacayo	12.00	4.00	4.00
»	Boosaaso	12.00	4.00	4.00
»	Hargeysa	6.00	2.00	2.00

Ka	Ku	3dii Sh. So.	Daqiiqo Sh. So.	Halkii ee dheeraad Sh. So.	daqiiqo ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
»	Afgooye	15.00		5.00		5.00
»	Shalambood	15.00		5.00		5.00
»	Janaale	15.00		5.00		5.00
»	Marka	15.00		5.00		5.00
»	Balcad	15.00		5.00		5.00
»	Jowhar	13.20		4.40		4.40
»	Qoryooley	15.00		5.00		5.00
»	Jelib	15.00		5.00		5.00
»	Jamaama	15.00		5.00		5.00
»	Kismaayo	15.00		5.00		5.00
Afgooye	Gaalkacayo	11.40		3.80		3.80
	Muqdisho	3.00		1.00		1.00
	Baydhabo	7.20		2.40		2.40
	Beled Weyne	8.10		2.70		2.70
	Boosaaso	15.00		5.00		5.00
	Hargeysa	15.00		5.00		5.00
	Burco	13.20		4.40		4.40
	Berbera	15.00		5.00		5.00
	Shalambood	3.60		1.20		1.20
	Janaale	4.80		1.60		1.60
	Marka	4.80		1.60		1.60
	Balcad	3.60		1.20		1.20
	Jowhar	5.70		1.90		1.90
	Qoryooley	5.70		1.90		1.90
	Jelib	8.10		2.70		2.70
	Jamaama	9.00		3.00		3.00
	Kismaayo	9.00		3.00		3.00
Shalambood	Muqdisho	4.80		1.60		1.60
	Baydhabo	8.10		2.70		2.70
	Beled Weyne	9.00		3.00		3.00
	Gaalkacayo	12.00		4.00		4.00
	Boosaaso	15.00		5.00		5.00
	Hargeysa	15.00		5.00		5.00
	Burco	15.00		5.00		5.00
	Berbera	15.00		5.00		5.00
	Janaale	2.10		0.70		0.70
	Marka	2.10		0.70		0.70
	Balcad	5.70		1.90		1.90
	Jowhar	6.00		2.00		2.00
	Qoryooley	3.00		1.00		1.00
	Jelib	7.20		2.40		2.40

Ka	Ku	3dii Daqiqo Sh. So.	Halkii daqiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Waci la tiray Sh. So.
Shalambood	Jamaama	8.10	2.70	2.70
»	Kismaayo	8.10	2.70	2.70
»	Afgooye	3.60	1.20	1.20
J a n a a l e	Muqdisho	5.70	1.90	1.90
»	Shalambood	2.10	0.70	0.70
»	Afgooye	4.80	1.60	1.60
»	Baydhabo	8.10	2.70	2.70
»	Beled Weyne	9.00	3.00	3.00
»	Gaalkacayo	12.00	4.00	4.00
»	Boosaaso	15.00	5.00	5.00
»	Hargeysa	15.00	5.00	5.00
»	Burco	15.00	5.00	5.00
»	Berbera	15.00	5.00	5.00
»	Marka	2.10	0.70	0.70
»	Balcad	5.70	1.90	1.90
»	Jowhar	6.00	2.00	2.00
»	Qoryooley	2.10	0.70	0.70
»	Jelibe	7.20	2.40	2.40
»	Jamaama	8.10	2.70	2.70
»	Kismaayo	8.10	2.70	2.70
M a r k a	Muqdisho	5.70	1.90	1.90
»	Janaale	2.10	0.70	0.70
»	Afgooye	4.80	1.60	1.60
»	Baydhabo	8.10	2.70	2.70
»	Beled Weyne	9.00	3.00	3.00
»	Gaalkacayo	12.00	4.00	4.00
»	Boosaaso	15.00	5.00	5.00
»	Hargeysa	15.00	5.00	5.00
»	Burco	15.00	5.00	5.00
»	Balcad	5.70	1.90	1.90
»	Jowhar	6.00	2.00	2.00
»	Qoryooley	3.00	1.00	1.00
»	Jelib	7.20	2.40	2.40
»	Jamaama	8.10	2.70	2.70
»	Kismaayo	8.10	2.70	2.70
»	Berbera	15.00	5.00	5.00
»	Shalambod	2.10	0.70	0.70
B a l c a d	Muqdisho	3.00	1.00	1.00
»	Marka	5.70	1.90	1.90
»	Afgooye	3.60	1.20	1.20
	Baydhabo	8.10	2.70	2.70

Ka	Ku	3dii Sh. So.	Daqiqo ee Sh. So.	Halkii dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
Balcad	Beled Weync	7.20		2.40	2.40
»	Gaalkacayo	10.80		3.60	3.60
»	Boosaaso	13.20		4.40	4.40
»	Hargeysa	15.00		5.00	5.00
»	Burco	13.20		4.40	4.40
»	Berbera	15.00		5.00	5.00
»	Shalambood	5.70		1.90	1.90
»	Janaale	5.70		1.90	1.90
»	Marka	5.70		1.90	1.90
»	Jowhar	3.00		1.00	1.00
»	Qoryooley	6.00		2.00	2.00
»	Jelib	9.00		3.00	3.00
»	Jamaama	9.00		3.00	3.00
»	Kismaayo	9.90		3.30	3.30
J o w h a r .	Muqdisho	4.80		1.60	1.60
»	Balcad	3.00		1.00	1.00
»	Afgooye	5.70		1.90	1.90
»	Baydhabo	810		2.70	2.70
»	Beled Weyne	7.20		2.40	2.40
»	Gaalkacayo	10.80		3.60	3.60
»	Boosaaso	13.20		4.40	4.40
»	Hargeysa	15.00		5.00	5.00
»	Burco	13.20		4.40	4.40
»	Berbera	15.00		5.00	5.00
»	Shalambood	6.00		2.00	2.00
»	Janaale	6.00		2.00	2.00
»	Marka	6.00		2.00	2.00
»	Qoryooley	7.20		2.40	2.40
»	Jelib	9.00		3.00	3.00
»	Jamaama	9.90		3.30	3.30
»	Kismaayo	9.90		3.30	3.30
Qoryooley	Muqdisho	5.70		1.90	1.90
»	Jowhar	7.20		1.90	1.90
»	Afgooye	5.70		1.90	1.90
»	Baydhabo	8.10		2.70	2.70
»	Beled Weyne	9.00		3.00	3.00
»	Gaalkacayo	12.00		4.00	4.00
»	Boosaaso	15.00		5.00	5.00
»	Hargeysa	15.00		5.00	5.00
»	Burco	15.00		5.00	5.00
»	Berbera	15.00		5.00	5.00

Ka	Ku	3dii Sh. So.	Daqiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Halkii daqiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
»	Shalambood	3.00	1.00	1.00	
»	Janaale	2.10	0.70	0.70	
»	Marka	3.00	1.00	1.00	
»	Balcad	6.00	2.00	2.00	
»	Jelib	7.20	2.40	2.40	
»	Jamaama	8.10	2.70	2.70	
»	Kismaayo	8.10	2.70	2.70	
J e l i b	Muqdisho	8.10	2.70	2.70	
	Qoryooley	7.20	2.40	2.40	
	Afgooye	8.10	2.70	2.70	
	Baydhabo	9.90	3.30	3.30	
	Beled Weyne	10.80	3.60	3.60	
	Gaalkacayo	13.20	4.40	4.40	
	Boosaaso	15.00	5.00	5.00	
	Hargeysa	15.00	5.00	5.00	
	Burco	15.00	5.00	5.00	
	Berbera	15.00	5.00	5.00	
	Shalambood	7.20	2.40	2.40	
	Janaale	7.20	2.40	2.40	
	Marka	7.20	2.40	2.40	
	Balcad	9.00	3.00	3.00	
	Jowhar	9.00	3.00	3.00	
	Jamaama	3.60	1.20	1.20	
	Kismaayo	5.70	1.90	1.90	
Jamaama	Muqdisho	9.00	3.00	3.00	
	Jelib	3.60	1.20	1.20	
	Afgooye	9.00	3.00	3.00	
	Baydhabo	10.80	3.60	3.60	
	Beled Weyne	11.40	3.80	3.80	
	Gaalkacayo	13.20	4.40	4.40	
	Boosaaso	15.00	5.00	5.00	
	Hargeysa	15.00	5.00	5.00	
	Burco	15.00	5.00	5.00	
	Berbera	15.00	5.00	5.00	
	Shalambood	8.10	2.70	2.70	
	Janaale	8.10	2.70	2.70	
	Marka	8.10	2.70	2.70	
	Balacad	9.00	3.00	3.00	
	Jowhar	9.90	3.30	3.30	
	Qoryooley	8.10	2.70	2.70	
	Kismaayo	3.60	1.20	1.20	

Ka	Ku	3dii Daqiqo Sh. So.	Halkii daqiqo ee dheeraad ah Sh. So.	Wacid la tiray Sh. So.
Kismaayo	Muqdisho	9.00	3.00	3.00
»	Jamaama	3.60	1.20	1.20
»	Afgooye	9.00	3.00	3.00
»	Baydhabo	11.40	3.80	3.80
»	Beled Weyne	12.00	4.00	4.00
»	Gaalkacayo	13.20	4.40	4.40
»	Boosaaso	15.00	5.00	5.00
»	Hargeysa	15.00	5.00	5.00
»	Burco	15.00	5.00	5.00
»	Berbera	15.00	5.00	5.00
»	Shalambood	8.10	2.70	2.70
»	Janaale	8.10	2.70	2.70
»	Marka	8.10	2.70	2.70
»	Balcad	9.90	3.30	3.30
»	Jowhar	9.90	3.30	3.30
»	Qoryooley	8.10	2.70	2.70
»	Jelib	5.70	1.90	1.90

Amar xeerkani waxa lagu soo dhigi doonaa Warqadda faafinta Ras-miga ah (Official Bulletin) ee Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliyeed waxanu hirgeli doonaa marka laga bilaabo 1da Noofamber 1974.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Jaalle G. S. Axmed Faarax

XOGHAYAHA DAWLADDA

Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsinta

Jaalle Dr. Maxamed Y. Weyrax

XOGHAYAHA DAWLADDA

Wasaaradda Maaliyadda

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 18 Agoosto 1974, L. 126.

Siiismo dhul Dawlaadeed la siiyay Jaalle Muxyaddin Jumcaale, kuna yaal Muq-disho, Jidka Bender Gassim ,kuna fadhiyaa mq. 1.200.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda Koowaad iyo tii labaad ee Ka-caanka iyo Xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 115 taarikhdeduna ahayd 13 Sebtember 1956;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Muxyaddin Muuse Jumcaale, taarikhdeeduna ahayd 8-3-1958, uu ku weydiisanayay dhul sismo Dawadeed kuna yaal Muqdisho — Jidka Bender Gassim;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafi-ska ku shaqa lahaa,laguna daabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda L. 12 taarikhdeeduna ahayd 1-12-1958;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolanshi gudiga Farsamada uu ku saab-saneed naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 1300 bishi 3-2-1959, soona gudubtay fadhibii 234°aad ee 3-2-59;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 1875 taarikhdeeduna ahayd 2 Majo 1960, in Jaalle Muxyaddin Muse Jumcale, uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 600, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 1015875 taarikhdeeduna ahayd 11-7-1960, in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiya mq. 1.200, kuna yaal Muq-disho, Jidka Bender Gassim;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muxyaddin Muse Jumcaale la siiyay dhul Dawlaadeed ee ku fadhiyaa mq. 1.200, kuna yaal Muqdisho, Jidka Bender Gassim.

Muqdisho, 1.Agoosto 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA

W. S. G. Sare Moxamed Sheekh Cosmaan

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 31.

Mogadiscio, li 6 Agosto 1974.

Il Sostituto Magistrato ai Conti:

Jaallo MAXAMED GALL FAAPAY

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Jamac Biixi, maalintii 22-11-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 juun uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa raktangolaar addimihiisuna ahaayeen 40x40, kuna fadhiye 1600 mdh., sababtoo ah in la beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-1131 ee 4 Dic. 1973, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa trabeesiyo, addimihiisu yihii 48; 34; 60, kuna fadhiya 2460, soohdimihii-suna yihii sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka 26 juniyo.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 13 iyo 19.

Muqdisho,

Kusime Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 29-7-74ka, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektaangolaar ah 40x30 kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lam. 48 iyo 22.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid
(237)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Nuur Guuled, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 1-10-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektaangolaar 30x20, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 21.

Galbeed waxaa wa xiga: Dhul lamb. 14.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 47.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1974.

Kusime

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Ini C. C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Xuseen (Aabat-Tafat), u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 1-9-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 60x30, kuna fadhiya 1.800 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Sheekh Cali.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Kacaanka.

Bari waxaa ka xiga lid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 30 Oktobar 1974.

Kusime

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(239) Inj. C. C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabaas Suufi, u usoo portay rji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 20-10-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 20x25, funa fadhiya 500 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 38.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lambb. 34.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 32.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1974.

Kusime

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(240) Inj. C.C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Impresa Sudano ee Pizzoglio, maalintii 19-9-1959 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka Afgooye uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa trabesiyo addimihisuna ahaayeen 94; 80; 54; 48; kuna fadhiile 7094 mdh., sababtoo ah in la beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oolagu soo diray warqadda lambareedu ahaa 1011-1202 ee 23-3-1960 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu wa trabesiyo, addimihiisu yihii 94; 80; 48; kuna fadhiya 4.176, soohrimihiisu na yihii sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jaalle Basbaas.

Koofur waxaa ka xiga: Jidka loo sado Afgooye.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Wasaaradda Beeraha.

Muqdisho,

Kusime Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. C. C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Aadan Cabdulle Hilowle, maalintii 10-9-1967, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada 7° Km., qaabkiisuna ahaa rektangolaar, additmisiisuna ahaayeen 60x50, kuna fadhiye 3000 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambareedu ahaa MWD-1129-1086-68 ee 22 Juun 1968 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looooga qaaday danta, guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada, jidka 21ka Oktoobar, qaabkiisuna waa rektangolaar addimihiisu yihii 30x20, kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka 21 Oktoobar.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 504.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 491.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 493.

Muqdisho,

Kusime Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Inj. C. C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Yuusuf Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 2-9-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho Wardhiigley, oo leh qiyas rektangolar 27x13,50, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqqoyi waxa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Nofembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(243) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab Sheekh Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 3-8-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyas rektangolaar ah 36x20, kuna fadhiya 720 mdh.

Soohdin:

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 6.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 1 iyo 3.

Bari waxa ka xiga: Jaalle Bashiir Yaroow.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Nofembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(244) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Axmed Maxamuud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 25-8-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda degmada 21 Oktoobar, oo leh qiyaas rektangolaar 30x20, kuuna fadhiya 600 mdh.

Soothdin:

Waquooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 916.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 909.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 911.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Nofember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(245)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadiija Saalax Cabdalla, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 6-10-1974kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan-Siliga X., oo leh qiyaas rektangolaar ah 30x20, kuna fadhiya 600 mdh.

Soothdin:

Waquooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 43.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 36.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 51.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Nofember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Isaaq Axmed Maxamed uu keenay degmadatan Baydhabo arji uu ku weydiisanaaye gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Baydhabo maalintii taariikhdu ay ahayd 18-9-66 sida u degmada qawaaninta dhibita dhulka dawladda ee degmo ahaaneed, dhulkaasi wuxuu ku yaal meesha loo yaqaan jidka Muqdisho sida ay caddeyneysa naqshadda ku lifaaqan, dhulka qaabkiisu waa rektangolaar addimihisu yihin 22x12 kuna fadhiya 264 mdh.

Qofkii daneynaaya wuxuu si fiican uga ariikaraa naqshada iyo ogeysiiska yaala Xafiiska gudoomiyaha degmada Baydhabo.

Waxaana laga doodi karaa muddo 30 maalmood ah oo laga bilaabo maalintii lagu soo dhejiye maadadaan Xafiiska Gudoomiyaha degmada Baydhabo si looogaado wixii bood ka qaba.

Baydhabo, 1 Nofember 1974.

Gudoomiyaha Degmada
Saxiix aan la akhrin karin

(247)

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

XEER Lambar 64 ee 15-10-1794

Heerka Sarriiska Lacagaha Qalaad.

TALIYAHAYO MAAMULAHAYA GUUD
EE BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aan, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seetembar, 1974 laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadhiinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed inuu cadeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacakteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Addunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKAY GARTEEN In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON In horay loo qaataay go'aan deg deg ah Lr. 167 ee 15-10-74, sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 muu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 19-10-1974, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliyeed.

Lacagaha qalaad		Heerka iibsashada oo Shilin ah	Heerka gadidda oo Shilin ah
UK £ 1	Giniga Ingiriiska	14.6107	14.9029
US \$ 1	Doolarka Maraykanka	6.2327	6.3573
D. M. 1	Maarkaha Jarmalka Galbeed	2.4058	2.4539
Lit. 107,33	Liiraha Talyaaniga	1.0000	—
Lit. 105,18	Liiraha Talyaaniga	—	1.0000
F. Fr. 1	Frankiga Fransiiska	1.3145	1.3408
Sw. Fr. 1	Frankiga Suweysara	2.1321	2.1747
Dj. Fr. 1	Frankiga Jabuuti	0.03525	0.03596

Muqdisho, 15-10-1974.

Cumar Axmed Cumar
Maamulaha Guud
(248)

Cabdiraxmaan N. Xirsi
Taliyaha

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaan aqriyey dacwadan;

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Keyd-siga iyo Amaahda waxaan ogaaday iney tahay shaqadedyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii buuga lacagta (ammortamento libretto) n. D. R. 624, Shs. 2.750.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninka la yiraahdo Maxamed Xaaji Xasan Maxamuud, muddo 30 beri ah , oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale oo Dawladda, hadaan qof kale oo ku sheegaanayaa usan jirin.

Waxaa kale la codsanayaa in Buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qofkale oo ka sita wakaale shaki aan laheyn, iyadoo la sugaayo 30kaas beri oo aan soo sheegnay.

Muqdisho, 30-10-1974.

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

GUDDOOMIYAH A MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

Markuu akhriye dacwaddan;

Markuu Arkay waxay ku saabsan tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganac-siga Soomaalidda laanta Kismaayo, aan ogAADAY inay tahay shaqa Xafii-skan;

Markan Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan Caddeeynaya Dhumidda Buuga L. 472 ku qoran lacag dhan 5.074 (shankuntodobaataniyoafar) Shs.;

Waxaan Amrayaa in lyoo cusbooneesiyo Moxamed Moxamuud Moxamed muddo 15 (shaniyotobaan) beri gudaheeda laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta rasmiga ah, haddan la helin qof kale oo buuga sheegta.

Waxaa Kaloo la caddeeynaya in buuga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 25 Setembar 1974.

Guddoomiyaha
Maxkamadda Gobolka J. Hoose
Dr. Xuseen Faarax Hilowle

(250)

FIYAAAT SOOMAALIYA S.p.A. — MUQDISHO

Capitale Sociale Sh. So. 1.450.000

O G E Y S I I S

Waxaa ogeysisis ah in Shirka Guud aan Caadiga ahayn dadka ku jira Shirkadda Fiyaat Soomaaliya S.p.A. ay isku imanayaan maalinta arbacada 4ta Disembar 1974 marka saacadu tahay 9,00 subaxnimo marka hore iyo 5ta Disembar 1974 isla 9,00 subaxnimo marka labaat, fadhigaaso lagu qaban doono Xaruunta Maamulka ku taal wadada Balcad ee Muqdisho si looga xaajoodo ajendada maalinta ah (ordine del giorno) ee socota:

Kordhintu capitale socialaha min 1. 450.000 illaa Sh. So. 1.700.000.

Hal Maamule (Un Amm.re)
Dr. Luigi Terenzio

(251)

HABO — TONNARA DI HABO — S. A.

Sede Sociale in Mogadiscio — Capitale Sociale Sh. So. 1.000.000

I Signori Soci sono convocati in Assemblea Ordinaria in Agrate Brianza (Milano - Italia) Via Matteotti, 62 — per il giorno 29 Novembre 1974 alle ore 9,30 per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Bilancio al 30 Giugno 1974 e relazione del Consiglio di Amministrazione;
2. — Relazione dei Sindaci;
3. — Deliberazioni sul bilancio al 30 Giugno 1974 e sulle relazioni del Consiglio di Amministrazione edei Sindaci;
4. — Nomina per integrazione Collegio Sindacale.

Qualora l'Assemblea non risultasse in numero legale per la prima convocazione, la seconda convocazione resta fissata per il giorno 30 Novembre 1974 nello stesso luogo, alle ore 9,30.

Mogadiscio, 1 Novembre 1974.

p. Il Consnglio di Amministrazione
Mario M.

KANDALA — INDUSTRIE SOMALE CONSERVIFICI E PESCA — S.p.A.

Sede Sociale in Mogadiscio — Capitale Sociale Sh. So. 2.000.000

I Signori Soci sono convocati in Assemblea Ordinaria in Agrate Brianza (Milano - Italia) Via Matteotti, 62 — per il giorno 29 Novembre 1974 alle ore 11 per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Bilancio al 30 Giugno 1974 e relazione del Consiglio di Amministrazione;
2. — Relazione dei Sindaci;
3. — Deliberazione sul bilancio al 30 Giugno 1974 e sulle relazioni del Consiglio di Amministrazione e dei Soci;
4. — Nomina per integrazione Collegio Sindacale.

Qualora l'Assemblea non risultasse in numero legale per la prima convocazione, la seconda convocazione resta fissata per il giorno 30 Novembre 1974 nello stesso luogo, alle ore 11.

Mogadiscio, 1 Novembre 1974.

p. Il Consnglio di Amministrazione